



UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **09/06/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- AHMED MURSAL ABDILE, Ina Saxarla Muxumed Sacdi, Somali ah, Ku Dhashay: Kismaayo, Sanadkii: 25/01/1955, Sita: Somali Passport, Lr. P01651943

LA WAKIISHE:- CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI, Ina Galbeed Yaasiin Xasan, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1986, Degan Wardhigleey, Sita: Kaarka Aqoonsiga Lr. 7559, Kana soo baxay Dowladda Hoose ee Muqdisho

B- Aniga oo ah **AHMED MURSAL ABDILE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI** una wakiishay Wax Alaale Waxii Hanti ah ee aan sida tooska ah milkiyadeeda u leeyahay guurto iyo maguurta ah, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka sida guryo, dhulal banaan, goof, beer, gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M. Waxaana si buuxda ugu wakiishay in uu ii gadi karo, Xafidi karo, dhisi karo, kireyn karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, Rahan galin karo kana saari karo rahanta, dayactiri karo, ilaalin karo, iina raadin karo wax alaale wixii Dukuminti Milkiyadeed ee Iga maqan, iina dalbi karo duplicate, u dacwoon karo, Qareen ii Qaban karo hadii loo baahdo, Xanaaneyn karo, igu matali karo magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, una idman yahay in uu si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karo, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **AHMED MURSAL ABDILE**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

AHMED MURSAL ABDILE

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDIRIZAK MOULID FARAH

2- MOHAMED OLAD HASSAN

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP: 1617/T.P.N/25, Tr. 09/06/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- AHMED MURSAL ABDILE** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- CABDIFITAAX MAXAMUUD CALI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By :ABDULI



NOOTAAYAHA

Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 11/06/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/fitaax Maxamuud Cali** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1617/T.P.N/25, Tr. 09/06/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/fitaax Maxamuud Cali
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyaha Axmed Mursal Cabdile
Taariikhda Wakaalada	09/06/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/fitaax Maxamuud Cali**, Leh Tel No. **0615500070**, Degan **Wardhigleey** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/fitaax Maxamuud Cali
